

SHIRARKA GUDIGA DUGSIGA, SHIRWEYN, AQOON ISWADAARO

Iyada oo la aqoonsanaayo baahida loo qabo sii wadida tababarka shaqada iyo hormarinta xubnahooda, Gudiga Waxbarashada waxa uu dhiirigelinayaa ka qaybgalka dhamaan xubnaha shirarka iyo hawlaha meelaha, gobolka, iyo ururada gudiyada dugsiyada qaranka, iyo sidoo kale hawlaha kooxaha kale ee waxbarasho. Xubnaha Gudiga waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay daraasad ku sameeyaan iyo ay baaraan qalabyada laga helo ururadaan iyo sidoo kale daabacaadyada iyo cajaladaha laga heli karo maktabada Gudiga.

Si loo xakameeyo labadaba maalgelinta waqtiga iyo dhaqaalaha lagama maarmaanka u ah hirgelinta siyaasadaan, Gudiga waxay dejiyaan mabaadi'da iyo habraacyadaan hagitaankooda:

1. Shaqaalaha Gudiga ayaa ururin doono, ilaalin doono, iyo u qaybin doono xubin kasto oo ka mid ah Gudiga jadwalka liiska shirarka Gudiga iskoolka, heshiisyada, iyo aqoon isweydaarsiyada, si ay uga caawiyaan Gudiga inay go'aan ka gaaraan shirarka u muuqdo kuwo ugu rajo wanaagsan marka la eego soo saarista faa'iidooyinka tooska ah iyo kuwa aan tooska ahayn ee Degmada.
2. Gudiga waxay u soo celin doontaa ka qaybgalayaasha shirka (xubnaha Gudiga) kharashaadka macquulka ah ee lagama maarmaanka ah ee aan si toos ah Degmada u bixinin (safarka, hoteelka, cunto, diiwaangelinta).
3. Marka xubin kasto oo ka mid ah Gudiga ka soo qayb galo kulan, shirweyn, ama aqoon iswaydaarsi, xubinta waxaa laga codsan doonaa inay la wadaagaan macluumaadka, talooyinka, iyo qalabyada laga helay kulankaas.

Qoraalka: La qaatay Abriil 27, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 628

ct/sg